Niederschrift über die Belehrung vor Anerkennung der Vaterschaft oder der Unterhaltsverpflichtung

Dresden.

Qoraalka tilmaamaha ee ku saabsan aqoonsiga aabanimada kahor ama waajibaadka masruufka

Cawaaqibta sharciga ee aqoonsiga aabanimada

Waxaa la ii tilmaamay, in marka aan aqoonsado aabanimada ee u dhaxaysa ilmaha iyo naftayda, in aan qaadan doono xiriir qaraabanimo oo leh dhammaan cawaaqibka sharciga. Sidaa darteed waxaa i fuulaya masruufka ilmaha, laga yaabo xitaa ilaa iyo da'da dhaafsan qaangaarka. Waxaa intaas dheer, haddii loo baahdo, hooyada ilmuhu waxay aniga iga codsan kartaa dib-u- bixinta kharashyada dhalmada iyo masruufka, kahor dhalmada iyo kadib. Xaaladaha qaarkood, sheegashada masruufka ee daryeelka ilmaha, ayaa jiri kara ugu yaraan saddex sano ee dhalashada kadib.
Aqoonsigu, wuxuu ilmaha ka dhigaa dhaxalka sharciga ah.

Xuquuqda xiriirka

Waxaan xaq u leeyahay inaan la macaamilo ilmaha, laakiin sidoo kale waxy igu tahay waajib. Haddii ay dhacdo isku dhac, la macaamilka cunugga waxaa xukumi kara Maxkamadda Qoyska, laakiin waxaa la xaddidi karaa oo keliya ama laga reebi karaa shuruudaha sharciga qaarkood.

Masuuliyadda

Waalidiinta aan is qabin, waxaa masuuliyadda ilmaha leh hooyada qaangaarka ah kaligeed. Masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah waxay u baahan tahay in aniga iyo hooyadu aan ku caddeyno diwaangelinta foomka caamka ah, inaan rabno in aan isla wadaagno masuuliyadda waalidnimada. Masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah waxay ku dhacdaa xagga sharciga, haddii aan hooyada guursado.

Haddii kale, marka uu ka codsado mid kamid ah waalidiinta, Maxkamadda Qoysku waxay ku wareejin kartaa masuuliyadda waalidnimada gebi ahaan ama qayb hooyada ama aniga, si wadajir ah ama aniga kaligay, haddii la filayo in tani aysan kahor imaanaynin danaha ugu fiican ee ilmaha. Shuruudahan waxaa loo malaynayaa sharci, haddii aan ka codsado Maxkamadda in aan ku wareejiyo masuuliyadda waalidnimada hooyada iyo aniga si wadajir ah, sababaha ka soo horjeedana aysan hooyadu soo bandhigin ama aysan si kale u caddayn.

Magaca Qoyska

Cunuggu mar walba wuxuu sitaa magac ahaan, magaca qoyska ee hooyada. Xaaladda masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah, waxaan hooyada kula go'aamin karaa, in cunuggu helo magacayga qoyska. Haddii aniga iyo hooyadu mar hore samaynay masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah dhalashada kahor, waa inaan go'aan ka gaarno magaca ilmaha marka aan iska diwaangelinayno Xaafiiska Standesamt. Haddii aanan magac bixin karin waqtigaan la joogo, waa inaan ku magacownaa muddo bil gudaheed ah, anagoo u marayna caddeyn laga xaqiijiyay Xaafiiska Standesamt.

Haddii, si kastaba ha ahaatee, cunuggu markii hore haystay magaca qoyska ee hooyada, taasoo kaligeed haysatay masuuliyadda waalidnimada, kadibna masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah la go'aamiyo, magaca cunugga waxaa dib u go'aamin kara aniga iyo hooyada saddex bilood gudahood. Xaaladaha oo dhan, go'aaminta magaca oo ku salaysan masuuliyadda waalidnimada ee wadajirka ah, lagama noqon karo waxayna sidoo kale khusaysaa carruurta kale ee wadajirka ah. Haddii cunugga la siinayo magacayga, oo aan haysto masuuliyadda waalidnimada ee kaliga ah, aniga iyo hooyadu waa inaan oggolaanshaheena siinaa Xaafiiska Standesamt.

Aqoonsiga aabanimada

Aqoonsigayga aabanimada wuxuu kaliya oo hirgalayaa, haddii hooyadu bixiso oggolaansho qoraal ah. Haddii hooyadu aanay gudan karin masuuliyadda waalidnimo, tusaale ahaan maadaama ay wali qaan gaar ahayn, caddayntu waxay u baahan tahay ogolaanshaha wakiilkeeda sharciga. Waxaa intaa dheer, waxaa loo baahan yahay oggolaanshaha ilmaha ee aqoonsigayga aabanimada. Tan waxaa sharxaya wakiilka sharciga, tusaale ahaan masuulka rasmiga ah. Haddii cunuggu ka weyn yahay 14 sano, wuxuu ku dhiibi karaa oggolaanshihiisa, oggolaanshaha wakiilkooda sharciga.

Mabda'ahaan, qirashada aabanimadu ma hirgeli karto inta aabanimada nin kale leeyahay, tusaale ahaan ninka hooyada. Haddii cunuggu dhasho kadib marka markii Dacwada- furitaanka la bilaabay, nin kale ayaa aqoonsan kara aabanimada. Si kastaba ha ahaatee, tani waa in la sameeyaa ugu dambayn hal sano kadib, marka go'aanka furitaanku noqdo mid kama dambays ah. Xaaladdaan oo kale, aqoonsiga aabanimada waxay hirgashaa isla marka - ninkii hore – oggolaado (taas oo ay tahay, in sidoo kale lagu sameeyo muddada halka sano gudaheed ah).

Mabda'ahaan kama noqon karo aqoonsiga aabanimada. Marka laga reebo, waxaan xaq u leeyahay ka noqoshada, haddii aqoonsiga aabanimadu uusan weli dhaqan gelin hal sano kadib, zusaale ahaan oggolaanshaha loo baahan yahay ayaa weli maqan.

Waxaan aqoonsiga aabanimada uga doodi karaa Maxkamadda, haddii aan ogaado duruufo lid ku ah aqoonsigayga aabanimada. Caqabada noocaan oo kale ah, waxay suurtagal tahay oo kaliya muddo laba sano gudahood ah. Muddadu waxay bilaabmaysaa, isla markaan ogaado duruufaha ka soo horjeeda aabanimadayda. Hooyada ama cunuugu waxay sidoo kale ka doodi karaan aabanimada.

Aabanimadu waxay dib ka noqon kartaa mid aan waxtar lahayn, isla marka ay Maxkamaddu go'aamiso in qofka aqoonsanaya uusan ahayn aabaha cunugga. Aqoonsigu sidoo kale waxtar ma leh, haddii uusan u hogaansamin qodobada Xeerarka Madaniga ah, haddii ilaa in ka badan shan sano ay ka soo wareegtay geliaanka diwaanka ee xaaladda madaniga ah. Marka la codsado, waxaa la igu wargelin karaa wakhtiga rimidda sharciyeed (muddada sharciyeed ee rimidda ee suurtagalka ah) ee cunugga.

Aqoonsiga aabanimada iyo Jinsiyadda

Haddii mid ama in ka badan oo ka -qaybgalayaashu ay yihiin jinsiyad shisheeye, aqoonsiga aabanimada wuxuu kaloo yeelan karaa cawaaqib sharci oo waafaqsan sharciga wadankooda, tusaale ahaan magaca ama jinsiyadda cunugga. Haddii shaki jiro, macluumaadka arrintaan ku saabsan waxaa laga heli karaa ergada diblomaasiyeed ee wadanka ay khusayso. Xaafiisyada Standesamt waxay sidoo kale bixiyaan macluumaad ku saabsan tan, inta ay awoodaan. Cunugga hooyadiis ay tahay shisheeye, waxay ku hesdhaa hadduu aabuhu yahay Jarmal, dhaladhada Jarmalka.

Bixinta Masruufka

Waxaan sidoo kale rabaa inaan ballan qaado bixinta masruufka. Caddayntaan ballanqaadku waxay dhaqan geli doontaa isla marka aqoonsiga aabanimadu uu noqdo mid sharci ahaan dhaqan galay. Waan ogahay inay waajib igu tahay masruufka cunnugga sharci ahaan igu tiirsan. Waajibaadkani kuma eka marka cunuggu qaagaar yahay, tusaale ahaan haddii sidoo kale ku jiro waxbarashada. Sidaa darteed, sidoo kale lama oggola, iyada oo aan oggolaansho laga helin wakiilka ilmaha, in la xaddido waajibaadka masruufka ee lagu xaqiijinayo muddada carruurta aan qaan gaarin. Cunugga aan qaarka ahayn ee aan aniga guriga igula noolayn, ayaa kala dooran kara inta u dhaxeysa (tiro) go'an, ama masruufka firfircoon (boqoleyda masruufka ugu yar ee ay kala leeyihiin). Masruufka ugu yar ee sharciga ah wuxuu ku saleysan yahay xaddiga kaalmada carruurta ee uu qeexayo sharciga canshuuraha. Haddii lacagta bilaashka ah la kordhiyo, masruufka ugu yar ee sharciga ah, ayaa sidoo kale u kordha si waafaqsan. Sidoo kale waan ogahay heerka ay hadda joogto.

Lacagta cunugga ee ku waajibtay cunugga, waa in loo adeegsadaa daboolidda baahidiisa lacageed. Ilaa iyo inta uu cunuggu qaangaar ka noqonayo, nus kamid ah lacagta cunugga ayaa tan loo isticmaalaa, oo sidaas bay ii anfacaysaa anigoo yaraynaya waajibaadka lacag bixinta. Sidoo kale, hooyadu si isku mid ah ayay u bixinaysaa masruufka cunugga, iyada oo haysa cunugga. Laga bilaabo da'da qaangaarka, hooyadu waa inay sidoo kale u dulqaadataa baahida lacagta ee cunugga si joogto ah - marka la eego dhakhliga la oggolyahay - ee labada waalidba. Dhakhligooda, tusaale ahaan mushaharka tababarka ama dheefaha-BAföG, iyo sidoo kale lacagta carruurta oo dhan, waa in laga dhimaa shuruudahaan. Ka sokow masruufyada socda, cunuggaygu wuxuu kaloo dalban karaa baahiyo dheeraad ah, tusaale ahaan haddii uu dhaco xanuun. Xaaladaha qaarkood wuxuu cunuggu dalban karaa, shuruudo gaar ah haddii aysan joogto ahayn, kharashyo gaar ah oo aad u badan, kuwaas oo aan lagu bixin karin masruufka caadiga ah. Tan waxaa kaloo kamid ah alaabta ugu horeysa ee dhallaanka.

Cunugaygu wuxuu dib iiga codsan karaa masruuf, laga bilaabo dhalashada haddii horey looga hor istaagay sheegashada masruufka, sababo la xiriira sharciga. Si kastaba ha ahaatee, ilaa qof kale ama hay'ado kale, sida „aabaha beenta ah" (oo aaminsan inuu yahay aabaha dhalay) ama Xaafiisyada Sozial- ama JugendamtInsoweit ay daryeel u fidiyeen cunugayga, sheegashadii uu igu soo oogay ayaa tan loo wareejinayaa. Marka tan la eego, ilaa heerkaas anigu iskuma waajibin karo bixinta waajibka ah ee ka dhanka cunuggayga.

Waajibaadka bixinta macluumaadka

Marka la eego Xeerka Madaniga ah, waxaa kale oo igu waajib ah in aan bixiyo macluumaad ku saabsan duruufahayga shaqsiyeed iyo dhaqaalahaba labadii sanaba mar, marka la codsado ilaa inta ay lagama maarmaan tahay in la sameeyo sheegashada masruufka. Macluumaadka waxaa la codsan karaa oo kaliya, kahor inta ayasan labada sano dhicin, haddii laga dhigo mid lagu kalsoonaan karo in qofka ay ku qasban tahay inuu bixiyo macluumaad, markii uu dib ka helay dhakhli aad u sarreeya ama hanti dheeraad ah. Xaqa macluumaadka waxaa lagu fulin karaa codsiga Maxkamadda Qoyska.

Haddii baahida masrufku cunuggu is beddesho ama haddii xaaladda noloshaydu is beddesho, sida dhakhliga iyo xaaladda guurka, cunugga ama aniga ayaa codsan kara in wax laga beddelo xaddigga masruufka oo aan ka codsado Maxkamadda Qoyska. Heshiis ka baxsan Maxkamadda, oo lagu heshiiyo si looga fogaado kharashaadka Maxkamadda waa in la isku dayo intaan Maxkamaddu ku lug yeelan.

Dhaqangelinta khasabka ah

Shahaadada maanta la sameeyay, waxaan ku dhiibayaa dhaqangelinta khasabka ee degdegga ah. Hadii aanan bixin masruufka ku habboon, hantitayda ama mushaharkayga ama dhakhligayga oo kale ayaa isla markiiba lagu lifaaqi karaa dukumiintigaan. Intaa waxaa sii dheer, cunuggu wuxuu dalban karaa dulsaar ku baaqi ah oo ku soo hadhay taas oo, ku xidhan xeerka saldhigga ee hadda, waxay noqon kartaa in ka badan boqolkiiba shan. Kuwani waa in si gooni ah loo go'aamiyaa. Ku xadgudubka ulakaca ah ee waajibaadka masruufka, waxaa lagu ciqaabi karaa ganaax ama xabsi ilaa saddex sano ah.

Helitaanka qoraalka waxaa lagu xaqiijinayaa shahaadada asalka ah.

Fadlan wixii su'aalo ah ku soo hagaaji Xaafiiska Jugendamt, qaybta Beistandschaften/Beurkundungen.

Saacadaha Xaafiiska	Talaadada, Khamiista	9 ilaa 18 Saac
	Arbacada, Jimcada	9 ilaa 12 Saac
Telefoon	(03 51) 4 88 56 16	
E-Mail	beistandschaften-beurkundung@dresden.de	

Daabac

Bixiyaha
Caasimadda Gobolka Dresden, Xaafiiska Saxaafadda-, Xiriirka Dadweynaha iyo Habmaamuuska, Jugendamt

Postfach 12 00 20
01001 Dresden
www.dresden.de
facebook.com/stadt.dresden

Lambarka maamulka dhexe 115 – Waan jecelnahay su'aalaha

Shaqaalaha tifaftirka: Qaybo qoraalka waxaa fuliyay DIJuF waxaana tafatire ahaa Jugendamt ee Caasimadda Gobolka Dresden.

Febraayo 2020

Dukumiintiyada elegtarooniga ah oo leh saxiixa elegtarooniga, oo ansaxa ah waa la soo gudbin karaa iyadoo la adeegsanayo foom. Waxaa kaloo jira iktiyaari, in E-Mailka loo soo gudbiyo Caasimadda Gobolka Dresden oo leh Shahaadada- S/MIME. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa www.dresden.de/kontakt. Qoraalkan macluumaadku wuxuu kamid yahay qayb shaqada xiriirka Dadweynaha ee Caasimadda Gobolka Dresden. Lama oggola in loo adeegsado xayaysiinta doorashada. Si kastaba ha ahaatee, xisbiyadu waxay u adeegsan karaan inay ku wargeliyaan xubnahooda.